WASAARADDA QORSHEYNTA, MAALGASHIGA
IYO HORUMARINTA DHAQAALAHA

WASAARADDA QORSHEYNTA QARANKA

# WARSIDAHA BISHA JANAAYO 2026



## HORDHAC

Bishii **Janaayo 2026** waxay Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha (WQM&HDH) si dardar leh u sii xoojisay doorkeeda hoggaamineed ee isku-duwidda horumarinta qaranka, iyadoo diiradda saartay hirgelinta Qorshaha Isbeddelka Qaranka (NTP 2025–2029), xoojinta hanaanka Kormeerka iyo Qiimeynta (K&Q), iyo kobcinta iskaashiga istiraatiijiga ah ee saaxiibada horumarinta.

Inta lagu guda jiray bisha, Wasaaraddu waxay qabatay kulamo istiraatiiji ah oo ay la yeelatay hay'ado caalami ah sida Alight, Medair, Human Appeal, UNFPA, iyo Midowga Yurub, kuwaas oo lagu adkeeyay waafajinta barnaamijyada horumarineed ee mudnaanta qaranka, tayeynta nidaamyada la-socodka iyo warbixinta ku saleysan natiijooyinka, iyo xaqiijinta daahfurnaanta iyo isla-xisaabtanka.

Sidoo kale, hoggaanka sare ee Wasaaradda ayaa dib u eegis ku sameeyay qorshe-howleedka 2026 si loo hubiyo fulin waqtiyeysan, isku-dubbaridan, oo ku saleysan waxqabad la cabbiri karo. Dhanka kale, Dowladda Federaalka Soomaaliya iyo Midowga Yurub ayaa si rasmi ah u daah-furay €102 milyan oo lagu taageerayo hirgelinta NTP, taas oo muujinaysa kalsoonida iyo wada-shaqeynta istiraatiijiga ah ee caalamiga ah.

Warbixintan bisha Janaayo 2026 waxay soo bandhigaysaa tallaabooyinka la qaaday, iskaashiyada la xoojiyay, iyo dadaallada lagu dardargelinayo qorsheyn ku saleysan natiijooyin, si loo xaqiijiyo horumar waara, xasillooni, iyo kobac dhaqaale oo loo dhan yahay.

## Wasaaradda Qorsheynta oo Xoojisay Iskaashiga Kormeerka iyo Qiimaynta ee Hay'adaha Alight iyo Medair



**Janaayo 26 & 31, 2026 –** Waaxda Kormeerka iyo Qiimeynta ee Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga, iyo Horumarinta Dhaqaalaha ayaa kulamo wadatashi ah la yeeshay Hay'adaha Alight Soomaaliya iyo Medair Soomaaliya, kuwaas oo lagu xoojinayay iskaashiga istiraatiijiyadeed ee dhinaca Kormeerka iyo Qiimeynta (M&E), si loo dardargeliyo daahfurnaanta, isla-xisaabtanka, iyo hufnaanta hirgelinta mashaariicda horumarineed.

Kulamada waxaa shir-guddoomiyay Mudane Maxamuud Siciid Nuur, Agaasimaha Waaxda Kormeerka iyo Qiimaynta. Kulankii 31-ka Janaayo waxaa ka qeyb galay Mudane Xuseen Cabdirisaaq Maxamed, Madaxa Mashaariicda ahna Ku-simaha Agaasimaha Guud ee Alight Soomaaliya, iyo Mudane Xasan Cabdiraxmaan Cabdi, Madaxa Kormeerka iyo Qiimaynta. Sidoo kale, kulankii 26-ka Janaayo waxaa ka qeyb galay Marwo Sophia Kahinga, Agaasimaha Guud ee Medair Soomaaliya, iyo hoggaanka mashaariicda hay'adda.

Intii ay socdeen kulamada, waxaa lagu soo bandhigay warbixinno ku saabsan waxqabadka barnaamijyada labada hay'adood, iyadoo diiradda la saaray: Hirgelinta iyo waafajinta Siyaasadda Qaran ee Kormeerka iyo Qiimaynta, Mideynta habraacyada M&E iyo fulinta kormeer iyo qiimayn wadajir ah, Xoojinta wadaagga xogta iyo tayeynta habraacyada fulinta iyo Hubinta in mashaariicdu ay si buuxda ula jaan-qaadaan mudnaanta Qorshaha Isbeddelka Qaranka (NTP).

Labada dhinac ayaa ku heshiiyay xoojinta wada-shaqeynta joogtada ah iyo qaadista tallaabooyin wax ku ool ah oo lagu xaqiijinayo natiijooyin la taaban karo oo waara, kuwaas oo kor u qaadaya maamul-wanaagga iyo wax-ku-oolnimada mashaariicda horumarineed.





## Soomaaliya iyo Midowga Yurub oo si rasmi ah u daah-furay €102 milyan oo lagu taageerayo hirgelinta NTP 2025–2029




**29-ka Janaayo 2026 -** Wasiirka Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha ee Xukuumadda Federaalka Soomaaliya, Mudane Maxamuud Cabdiraxmaan Sheekh Faarax (Beenebeene), isaga oo ay weheliyaan Wasiirka Maaliyadda Mudane Biixi Iimaan Cige, iyo Marwo Myriam Ferran, Ku-xigeenka Agaasimaha Guud ee Iskaashiga Caalamiga ah ee Midowga Yurub (EU), ayaa si rasmi ah u daah-furay €102 million oo Yuuro ah oo lagu maalgelinayo Soomaaliya, kuna jirta hindisah.

Maalgelintan ayaa ka kooban afar barnaamij oo istaraatiiji ah, kuwaas oo diiradda saaraya xoojinta dowlad-dhiska iyo xasilloonida, ballaarinta helitaanka waxbarasho tayo leh, maaraynta socdaalka iyo helidda xalal waara oo loogu talagalay barakacayaasha gudaha, iyo kobaca dhaqaale ee loo dhan yahay.

Barnaamijyadani waxay si buuxda ula jaanqaadayaan Qorshaha Isbeddelka Qaranka (NTP 2025–2029), iyaga oo si toos ah u taageeraya hirgelinta mudnaanta horumarineed ee Qaranka Soomaaliyeed, isla markaana gacan ka geysanaya xaqiijinta horumar waara, xasillooni, iyo fursado dhaqaale oo loo siman yahay.

Wasiirka Qorsheynta ayaa uga mahadceliyay Midowga Yurub taageerada joogtada ah iyo iskaashiga miro-dhalka ah ee ay la leeyihiin Dowladda Federaalka Soomaaliya, isagoo adkeeyay muhiimadda ay leedahay sii xoojinta wada-shaqeynta istaraatiijiga ah ee u dhexeysa Soomaaliya iyo Midowga Yurub.

## Madaxa Tababarrada MoPIED oo ka qaybgalay Tababar Heer Caalami ah oo ku saabsan Hababka Tababarka Casriga ah – Kuwait (19–29 Janaayo 2026)



**29-ka Janaayo 2026 -** Madaxa Tababarrada iyo Horumarinta ee Waaxda Shaqada iyo Shaqaalaha ee Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha, Mudane Idris Cismaan Cali ayaa ka qeybgalay Barnaamijka Tababarka Tababarayaasha ee Hababka Tababarka Casriga ah, oo lagu qabtay xarunta Machadka Qorsheynta Carabta ee Kuwait intii u dhaxaysay 19–29 Janaayo 2026.

Barnaamijku wuxuu diiradda saaray xoojinta xirfadaha tababarka, qorsheynta iyo maaraynta tababarrada, iyo adeegsiga hababka casriga ah si kor loogu qaado tayada tababarrada hay'adaha.

28-ka Janaayo 2026 - Waaxda Kormeerka iyo Qiimeynta ee Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha iyo Hay'adda Human Appeal Soomaaliya ayaa Muqdisho ku yeeshay kulan lagu xoojinayo iskaashiga Kormeerka iyo Qiimaynta, si loo adkeeyo daahfurnaanta, isla-xisaabtanka iyo hufnaanta.

Kulanka waxaa guddoomiyay Mudane Maxamuud Siciid Nuur, Agaasimaha Waaxda Kormeerka iyo Qiimaynta, waxaana ka qeyb galay Dr. Saydul Alom, Agaasimaha Guud ee Human Appeal Soomaaliya.

Doodaha kulanka ayaa diiradda saaray tayeynta nidaamyada fulinta mashaariicda, wadaagga xogta, iyo hubinta in barnaamijyada samafalka ay waafaqsan yihiin mudnaanta istiraatiijiyadeed ee qaranka, isla markaana si cadaalad ah u gaaraan bulshada nugul.

## Kulanka Hogaanka Sare ee Wasaaradda



**27-ka Janaayo 2026 -** Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha (WQM&HDH) ayaa Muqdisho ku qabatay kulanka hoggaanka sare ee uu guddoomiyay Wasiirka Wasaaradda, Mudane Maxamuud Cabdiraxmaan Sheekh Faarax (Beenebeene).

Kulanka waxaa ka qeyb galay Wasiir-Ku-xigeenka Wasaaradda, Mudane Maxamed Aadan Maxamed, Agaasimaha Guud, Mudane Maxamed Shire, Agaasimayaasha Waaxyaha, iyo La-taliyeyaasha Sare ee Wasaaradda.


Intii uu socday kulanka, hoggaanka wasaaradda waxay dib u eegis ku sameeyeen mudnaanta shaqo ee wasaaradda, iyagoo si gaar ah u falanqeeyay horumarka iyo jadwalka hirgelinta qorshe-howleedka shaqo ee sannadka 2026, si loo hubiyo fulin waqtiyeysan, isku-dubbaridan, oo ay wada fuliyaan dhammaan waaxyaha.

Kulanka ayaa sidoo kale diiradda lagu saaray dardargelinta hirgelinta Qorshaha Isbeddelka Qaranka (NTP) iyo xoojinta Hanaanka Kormeerka iyo Qiimeynta (K&Q), si kor loogu qaado isla-xisaabtanka, hufnaanta, iyo warbixinta ku salaysan natiijooyinka.

Sidoo kale, hoggaanku wuxuu qiimeeyay kulamada iyo wada-shaqeynta qorsheysan ee bah-wadaagta horumarinta, iyadoo xoogga la saaray is-waafajinta barnaamijyada iyo iskaashi wax-ku-ool ah. Arrimaha la xiriira joogitaanka shaqaalaha, waxqabadkooda, iyo isla-xisaabtanka ayaa iyaguna lagu falanqeeyay, si sare loogu qaado wax-soo-saarka iyo tayada howlwadeennada wasaaradda.

Wasaaradda Qorsheynta waxay mar kale adkaynaysaa sida ay uga go’an tahay xoojinta wada-shaqeynta heerarka kala duwan ee hay’adaha dowladda iyo saaxiibada horumarinta, hirgelinta qorsheyn ku saleysan natiijooyin, iyo dhisidda iskaashi miro-dhal ah, si loo xaqiijiyo mudnaanta horumarineed ee Qaranka Soomaaliyeed.

## Wasiirka Qorsheynta oo la kulmay Wakiilka UNFPA ee Soomaaliya




**25-ka Janaayo 2025 -** Wasiirka Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha ee Xukuumadda Federaalka Soomaaliya, Mudane Maxamuud C. Sheekh Faarax (Beenebeene), ayaa kulan miro-dhal ah la yeeshay Wakiilka UNFPA ee Soomaaliya, Dr. Mary Otieno.

Kulankan ayaa si qoto dheer loogu falanqeeyay xoojinta iskaashiga u dhexeeya Wasaaradda iyo UNFPA, gaar ahaan dhinacyada qorsheynta horumarineed, isku-duwidda mashaariicda, kormeerka, iyo qiimeynta barnaamijyada kala duwan.

Labada dhinac waxay ka wada hadleen sida loo hubin lahaa in dhammaan mashaariicda iyo barnaamijyada la fulinayo ay si buuxda ula jaan qaadaan Qorshaha Isbeddelka Qaranka (NTP) iyo Dukumintiga Barnaamijka UNFPA ee dalka, iyadoo xoogga la saarayo hufnaan, isla-xisaabtan, iyo saameyn waarta.

Sidoo kale, Mudane Beenebeene iyo Dr. Mary Otieno waxay mar kale adkeeyeen go'aankooda ku aaddan xoojinta wada-shaqeynta iyo iskaashiga joogtada ah ee u dhexeeya Wasaaradda iyo UNFPA, si loo dardar-geliyo hirgelinta yoolalka wadajirka ah ee horumarinta bulshada iyo tayeynta adeegyada muhiimka ah ee dalka.

## Abaalmarinta Howlwadeennada Ugu Shaqo-Wanaagsan 2025



**20-ka Janaayo 2026 -** Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha waxay xalay si sharaf iyo xamaasad leh u qabatay munaasabadda lagu maamuusay howl-wadeenadii ugu waxqabadka fiicnaa sannadka 2025.

Howlwadeennada la abaalmariyey—oo gaarayay dhowr iyo toban—ayaa la guddoonsiiyay shahaadooyin aqoonsi ay bixiyeen madax kala duwan oo ka soo qaybgalay munaasabadda, kuwaas oo isugu jiray Wasiirro, Xildhibaano, Guddiga Shaqaalaha Rayidka, wakiillo Bulshada Rayidka ah, iyo saraakiil sare oo Dowladda Federaalka ah.

Munaasabaddan oo xarunta wasaaradda ka dhacday, isla markaana sanad walba la qabto, waxay tahay astaan dhiirrigelin iyo bogaadin u ah shaqaalaha—si loo xoojiyo hufnaanta, tayada, iyo wax-soo-saarka shaqsiyadeed iyo kan wasaaradeedaba.

## Wasiir Ku-xigeenka Wasaaradda Qorsheynta Oo Ka Qaybgalay Kulanka Golaha Sare ee Machadka Qorsheynta Carabta ee Ka dhacay Kuwait



**8-da Janaayo 2026 -** Wasiir Ku-xigeenka Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, Maxamed Aadan Maxamed, ayaa ka qayb galay kulankii ugu horreeyay ee Golaha Sare (Board of Trustees) ee Machadka Qorsheynta Carabta ee sanadka 2025–2026, kaas oo ka dhacay xarunta machadka ee Kuwait.

Kulanka waxaa guddoomiyey Mudane Dr. Subaih Abdulaziz Al-Mukhizim, Guddoomiyaha Golaha Sare, iyadoo ay ka soo qayb galeen mas'uuliyiin sare iyo wakiillo ka kala socday dalalka xubnaha ka ah machadka.

Doodaha kulanka ayaa diiradda lagu saaray dib-u-eegista guulaha Machadka Qorsheynta Carabta ee hirgelinta qorshaha sanadlaha ah ee 2024–2025, oo ah sannadkii ugu dambeeyey ee Qorshaha Istiraatiijiyadeed ee Sagaalaad (2020–2025), iyo sidoo kale horumarinta dhinacyada hay'adeed, maaliyadeed iyo maamul, iyo barnaamijyada mustaqbalka.

Wasiir Ku-xigeenka ayaa carrabka ku adkeeyay doorka muhiimka ah ee machadku ku leeyahay taageeridda horumarka dalalka Carabta, isagoo ammaanay iskaashiga xooggan ee ka dhexeeya Soomaaliya iyo Machadka Qorsheynta Carabta. Waxa uu sidoo kale xaqiijiyay sida ay Wasaaraddu uga go'an tahay xoojinta iskaashiga dhinacyada tababarrada, dhisidda awoodda hay'adaha iyo qorshayaasha horumarineed.

